5

Xannaanaynta iyo ka Warqabka Caruurta

SOM 005/**2013**

XEERKA QOYSKA IYO DUMARKA DEGGAN ONTARIO

Dumarka oo dhan.
Hal Sharci oo Xeerka Qoyska ah.

Ogoow xuquuqdaada.

flew Family Law Education for Women
Women's Right to Know

fodf Femmes ontariennes et droit de la famille
Le droit de savoir

Xannaanaynta iyo ka Warqabka Caruurta

Buugan yar waxaa loogu tala galay in lagugu siiyo warbixin gaaban oo ku saabsan arrimaha khuseeyo sharciga. Xogtan ma lagu beedeli karo xogta gaarka ah iyo caawinaada qofka loo fidiyey oo sharciga ku saabsan. Haddii arrintaada ay khuseyso sharciga xeerka qoyska, waxaa lagugu talinayaa in aad raadsato la talin sharci ah sida ugu dhaqsiyaha badan si aad u fahamto dalabyadaada oo si xaqaada aad u dhacsato. Xogwarran dheeraad ah ee ku saabsan sida aad u heli lahayd qareenka arrimaha xeerka qoyska, lagacna aad u siin lahayd, ka fiiriso buugeena yar oo ku magacaaban "sida aad u heli lahayd cid kaa Caawinta Dhibaatada Xeerka Qoyska", iyo fiidiyowyadeena "Raadinta Qareenka Qeerka Qoyska" ee boggeena internetka www.onefamilylaw.ca.

Sharciga Kanada u degsan, wuxuu leeyahay badanaaba labada waalidba xaq ayay u leeyihiin xannaanaynta ah in ay koriyaan caruurtooda iyo in ay go'aamiyaan arrimaha ku saabsan daryeelida caruurta.

Haddii adiga iyo waalidka caruurta dhalay aad kala tagtaan ama aadan wada nooleyn, waa in aad qorsheysaa nolol maalmeedka caruurta iyo meesha ay ku noolaan lahaayeen. Qorshahan adiga ayaa keligaa sameyn karo, ama waxaad la tashan kartaa ruux qareen ah aa Maxkamad.

Xannaanaynta caruurta haddii aad ku heshiin waydaan, midkiin ayaa Maxkamadda ka codsan karo in la siiyo **xannaanaynta** ama **ka warqabka** caruurta. Waa in aad ka codsataa magaalada ama tuulada ay caruurta ku nooshahay in aad qaadato xannaanaynta ama ka warqabka caruurta. Heshiiska ku aadan xannaanaynta ama ka warqabka caruurta waa la bedeli karaa waxayna ku xirantahay xaaladda waalidka sida markaa ay isu bedesho.

Waa maxay Xannaanaynta?

Xannaaneynta waxaa lala jeedaa marka aad leedahay xuquuq sharci iyo mas'uuliyadda aad ku gaareyso dhamaan go'aamada muhiimsan ee ku saabsan nolosha ubadka. Tani waxaa ka mid ah sida:

- ubadka iskuul u doorida
- ubadka diin u doorida
- u gaarida go'aamada caafimaad ee ubadka.

Waalidka haysta xannaaneynta waxaa loogu yeeraa **waalidka xannaaneeya**, oo ubadka waqtiga badankooda wuxuu badanaaba la nool yahay waalidka xannaaneeya.

Waa maxay ka Warqabka?

Haddii hal waalid uu helo xannaanaynta ubadka, waalidka kale badanaaba inuu ka warqabo waa loo ogolaanayaa. Maxkamadda badanaaba waxay ka fekirtaa danaha ubadka u wanaagsan inuu xiriir labada waalidba la la'haado. Haddii ay Maxkamadda xukunto **ka warqab**, taasi waxay micnaheedu tahay xuquuq booqosho iyo ubadka uu waqti la qaato, iyo ka warqabka ubadka caafimaadkiisa, iyo fayo-qabkiisa iyo waxbarashadiisa. Xitaa waalid oo aan waqti badan ula qaadan ubadkiisa ama ubadkeeda ayaa badanaaba heli kara inuu arko.

Waalidka ka warqabi kara waxaa loogu yeeraa **waalidka aan xannaynta haysan** ama **waalidka ka warqaba.**

Haddii si tartiib ah oo daacadnimo ah aad ula hadli karto ubadkaaga walidkiisa kale, waxaad isla gaari kartaan heshiis aan rasmi ahayn ee ku saabsan xannaaneynta iyo ka warqabka. Waxaa fekrad wanaagsan ah in heshiiskaada aad ka dhigtaan mid qoraal ah, taariikhduna ku qoran tahay, oo ay labada waalidba wada saxiixaan. Waxaa wanaagsan in labada waalidka ay qareen u tagaan ee uu heshiiska arko, oo uu Maxkaddana loo gudbiyo.

Haddii waalidka kale aaddan la heshiin karin, ama haddii xiriirkiina yahay ama ahaa mid dibindaabyo badan, waxaa adi iyo ubadkaagaba u wanaagsan in aad

qareen aad u tagtaan oo aad qorsheysaan in aad Maxkamadda gaarto go'aanka xannaaneynta iyo ka warqabka.

Si kastaba ha noqotee, ubadka waxaa dhici karta inuu hal waalid kaliya uu la noolaado oo waalidka labaad uu oggolaado inuu qorshaha noolaanshaha. Haddiiba heshiiska noolaanshaha la oggol yahay, waalidka labaad oo xannaaneynta iska daayo, oo kaliya xaq u leeyahay inuu ka warqabo, aysan ka ahayn haddii heshiiska ama Xukunka Maxkamadda ay wax ka badesho.

Noocyada Xannaanaynta

Waxaa jira laba nooc ee ugu weyn ee qorsheynta xannaaneynta:

1. Xannaanayn Kali ah

Haddii aad **kaligaa** u madax banaantahay, waxaad xaq u leedahay in aad go'aan ka gaarto aayaha iyo nolosha caruurtaada. Waxaad **keligaa** go'aan ka gaari kartaa arrimaha ku aadan caruurtaada caafimaadkooda, waxbarashadooda, iyo waxbarashada ku aadan diintooda.

Waalidka kale badanaaba wuxuu xaq u leeyahay inuu oggaado go'aamada aad gaareyso, lakiin kuuma sheegi karo go'aanka aad ubadkaaga u gaareyso.

2. Xannaaneyn Wadajir ah

Haddii xilka xannaanaynta caruurta aad **wadaagtaan** adiga iyo waalidka kale, labadiinaba waxaad xaq u leedihiin in aad ka wada tashataan aayaha iyo nolosha caruurtiina, ee idinkaga baahan in aad si wadajir ah uga wada shaqeysaan. Haddii ay Maxkamadda ogtahay in waalidiinta aysan heshiin karin, ama haddii uu jiro ama jirey ku-tagri fal, Maxkamadda waxay ubadan tahay in aysan amrin wax xannaaneyn wadajir ah.

Wadaagitaanka xannaaneynta ma ahan micnaheeda in ubadka isku waqti la wada noolaan doono waalid kasta.

Waa in aad oggaataa: Inkastoo Maxkamadda ay go'aamineyso heshiiska xannaaneynta ee kama dambeyska ah, waxaa dhici karta in **xannaaneyn ku meelgaar ah ama aan joogto ahan** siiso mid ka mid ah waalidiinta. Heshiiska wuxuu socon doonaa ilaa iyo Maxkamadda ay ka soo saareyso Xukun xannaaneynta kama dambeys ah. Xannaaneynta ku meel gaarka ah waa muhiim maxaa yeeley Maxkamadda waxay badanaaba dooneysaa in ay sii socoto qorshaha horeyba ubadka u shaqeynaayay ee soo jirey.

Noocyada ka Warqabka

Maxkamadda waxay sameyn kartaa noocyo Xukun oo kala duwan. Qaar waa kuwa aad u furan inta kuwa kalena ay yihiin kuwa gaar ah.

1. Ka Warqab Caqligal ah

Maxkamadda waxay amari kartaa in mid ka mid ah waalidka la siiyo xannaaneynta oo waalidka kale la siiyo **ka warqab caqligal ah**. Tani waxay adiga iyo ubadka waalidkiisa kale u oggolaaneysaa inuu heshiis ka warqabid ee aad labadiinaba isku raaceysaan aad wada gaartaan.

2. Ka Warqabid Go'an ama Xadidan

Haddii ubadkaaga waalidkiisa kale aaddan wada heshiineyn, waxaad Maxkamadda weydiisan kartaa Xukun isla meel-dhigta shuruudaha booqashooyinka ka Warqabka, sida goorta, mudada iyo kolba mudada intee la eeg ee booqashada noqon doonto. Tani waxaa loogu yeeraa **ka warqabid go'an ama xadidan**. Haddii xiriirkaaga yahay ama ahaa mid dibindaabyo badan, waxaad Maxkamadda aad weydiisan kartaa in ay meel-dhigto taariikhda iyo saacaddaha booqashada si markaa aaddan ula hadlin waalidka arrimahan aaddan uga wada hadlin.

3. Ka Warqab Tartiib-tartiib ah

Marmarka qaarkood, Maxkamadda waxay go'aamin kartaa **ka warqabid tartiib-tartiib ah in la dejiyo**. Tani waxay micnaheedu tahay in waalidka ka warqabkiisa canuga oo uu waqtiga aad u xadidan yahay marka koowaad, laakin tartiib-tartiib loo kordhin karo. Ka warqabidda noocan ah waxay siineysaa caruurta fursad ay ku bartaan kuna kalsoonaadaan waalidka kale. Maxkamadda waxay amreysaa ka warqabidda noocaan ah kolka ay caruurta waqti badan arag waalidkan dhalay ama uu ka tagay ayaga oo aad u da' yar.

4. Ka Warqabka Kormeerka

Maxkamadda waxay amri kartaa **ka karqabka kormeerka** haddii ay ka wal-washo nabadgelyada caruurta ama haddii waalidka iyo canugga aysan waqti badan is aqoonin. Ka warqabka kormeerka waxaa loola jeedaa waalidka looma ogolaanayo in uu kaligii la joogo caruurta. Ruuxa waardiyaha ah wuxuu noqon karaa qof ka tirsan reerka, ama qof maxkamadda ay u xilsaartay. Booqashada lagu waardiyeynaayo waalidka waxay ka dhici kartaa oo kale meelaha lagu magacaabo **xarumaha Ka warqabka kormeerka**, halkaasoo ay joogaan shaqaale waardiyeynta soo booqadaha u qaabilsan.

Maxkamadda waxay amri kartaa oo kale in uu ruux **ka warqab kormeeran** haddii laga ka wal-walayo in halkaa uu ka dhaco iska hor imaad ama nabad gelyo darro goorta adiga iyo waalidka kale aad ku kulantaan in ubadka aad kala wareegsataan. Is dhaafsashadan ka warqabka kormeerka waxay ka dhaci kartaa xarumo ka warqabid kormeere joogo, halkaasoo shaqaale idin ka caawin karo in aad adiga iyo waalidka kale ku kala wareejisataan si markaa looga fogaado xiriir kale oo qofka kale loola sameynayo. Goobta lagu kala badelanyo ka warqabka ayaa sidoo kale noqon kara goob amaan ah sida xarunta baliiska oo kale.

5. Ka Warqab ma Jiro

Marar dhif ah, waalidka waxaa **loo diidaa ka warqab** uu ubadkiisa ka warqabo. Tani waxa kaliya ay dhacdaa haddii Maxkamadda ay aaminsan tahay in ubadka uu dhaawac jir ama niyad kaga iman karto waalidka kale, oo ka warqabid korjoog ahna ilaalo ku filan aysan keeneyn.

Goobta uu Ubadka ku Noolyahay

Haddii aad adigu tahay qofka kaliya ee xannaaneeya, canuga adiga ayuu badanaaba ama waqtiyada oo dhan kula noolaaneyaa.

Laakiin xannaaneynta markastaaba ma go'aamiso halka uu ubadka ku nool yahay. Haddii aad xannaaneyn wadajir ah la leedahay waalidka kale ama haddii waalidka kale la siiyo ka warqab, canuga waxaa dhici karta in waqtigiisa loo qeybiyo labada waalidba. Ubadka waxaa dhici karta in mar mar uu waalidka kale la joogo habeen, maalmaha fasaxa ee sitimaanka, todobaadyo ama feestooyinka, waxay ku xiran tahay waxa aad ku heshiisaan, ama waxa ay Maxmaddu amarto.

Badanaa, canuga wuxuu waqti badan la qaataa hal waalid halka ay sida kale u ahaan la'hayd. Goorta ay sidan dhacdo, aqalka halka canuga uu waqti badan ku qaato ayaa waxaa loogu yeeraa **aqalka koowaad** ee ubadka uu ku nool yahay.

Waalidka xannaanada siiya inta ugu badan waxaa loogu yeeraa **daryeelbixiyaha koowaad** Maxkamadduhu waxay badanaaba ay go'aamisaa in caruurta ay ula noolaadaan waalidka ah daryeelbixiyaha koowaad badanaaba nololasha ubadka, ama daryeelbixiyaha koowaad inta lagu jiro goorta ay Maxkamadda ka go'aamineyso xannaaneynta.

Fulinta Amarada ka Warqaba iyo Xanaaneynta

Haddii Maxkamadda ay Amartey ciddii xannaanada noqon lahayd iyo ciddii ka warqabi lahayd caruurta, **waa in la fuliyaa** go'aankaas isaga ah. Adiga ama waalidka kale oo ubadka dhalay waa in aad ka codsataan boliiska in la fuliyo Amarka maxkamadda. Haddii aadan u oglaan waalidka kale in uu ka warqabo ubadka sida ay maxkamadda ugu ogolaatay, wuxuu weydiisan karaa Amarka maxkamadda in isaga lagu wareejiyo mas'uuliyadda ubadkiisa ama ubadkeeda, haddii isaga ama iyada ay soo dalbato.

Sharciga wuu kuu fasaxayaa in aad diido booqashada waalidka kale haddii aad u cabsaneysid amaanka caruurta. Haddii ay kula tahay in ubadkaaga halis uu ku jiro ooaad diidmo sameyso, qareen latasho sida ugu dhaqsiyaha badan. Xaalad deg-degga jirto, baliiska ka wac 911.

Mararka qaar waxaa dhacdo, waalid in uu ku dagaa lamo xaqiisa ah ka warqabka ubadka, kaddibna uusan imaan waqtiyadii loo amray. Falkan ubadka way dhibsan karaan, balse nasiib xumose waxay tahay, ma jiro sharci ku amri kara waalidkan in uu booqashadooda. Haddii ay arrintan si joogta ah ay u dhacdo, diiwaangeli taariikhaha uusan imaan iyo waqtiyada booqashada uu soo gaabiyey. Warbixintan qoran waxay kaa caawini kartaa in aad Maxkamadda ku noqoto oo aad weydiisato in heshiiska Amarka ka warqabka caruurta wax laga beddelo.

Sidee ayay Maxmadda u Go'aamineysaa Waxyaabaha ku Saabsan Xannaaneynta iyo ka Warqabka?

Maxkamadaha kolka ay gaarayaan go'aanka ah ciddii qaadi lahayd xannaanaynta caruurta iyo kan ka warqabidda caruurta ku saabsan, waa in ay kaliya tixgeliyaan **meesha ay ku jirto maslaxadda caruurta**. Waa sida adag uu sharciga muhimadda u saaray. Waxyaabaha qaar ee ay Maxkamadda ay eegi doontaa waa:

- horey xadgudub ma uga dhacay guriga?
- intee ayuu la eg yahay xiriirka ka dhexeeya caruurta iyo waalid kasta?
- intee ayuu la eg yahay kalgaceelka ka dhexeeya caruurta iyo waalid kasta?
- iintee muddo ah ayey caruurta ku noolaayeen guri deggan oo aan rabshad lahayn?

- waa maxay qorshaha uu waalid kasta u haayo caruurta ee ku aadan xanaanadooda iyo korriinkooda?
- intee ayey la egtahay xirfadda waalidnimada qof kasta?
- intee ayay la egtahay mid kasta kartida uu ubadkiisa wax ugu qaban karo?
- caruurta waa weyn, maxay rabaan caruurta?

Sidaas oo kale Maxkamdaha xeerka qoyska waxay tixgeliyaan wixii heshiis ah oo horey u jiray Arrintan waxaa lagu magacaabaa **sida ay tahay u daa (status quo)**. Haddii halka ay ku noolyihiin caruurta haddii ay u fiicantahay, badanaa Maxkamadda waxaa dhici karta in aysan dooneyn in isbedel wayn ku dhaqaaqin.

Xannaanaynta iyo ka warqabidda caruurta waalidka dhalay oo keli ah ma u banaana. Sharciga wuxuu leeyahay **cid kasta way u banaantahay** in uu soo codsado. Badanaa, waxaa Maxkamadda ka soo codsado dad ka mid ah reerka intiisa kale sida awoowe ama ayeeyo, adeerka hooyada qaba ama eedada aabaha qaba, eedooyin ama habar yaro. Cid kasta ha soo codsato, maxkamadda waxay had iyo jeer tixgelinaysaa meesha ay ku jirto maslaxadda caruurta ka hor inta aysan bixin ka warqab ama xannaaneyn.

La Guuridda Ubadka

Go'aan ugu dhibta badan ee had iyo jeer soo moq-noqan kara wuxuu yahay kolka uu waalidka caruurta mas'uulka ka ah uu go'aansado in uu ka guuro magaalada ay ubadka deggantahay una guuro gobol kale ama mar dhacda waddan kale in loo raro. Waaxaad raboon kartaa in aad u guurto halka ay u badan yihiin reerahaada si ay kuu caawiyaan ama meel fursad shaqo leh. Arrintan guuridda ah dhib weyn ayey u keeni kartaa waalidka kale oo ubadka dhalay si uu uga warqabo ubadka. Waxa ku xiran tahay masaafada loo guurey, qarashka booqoshooyinka ka warqabida ayaa sidoo kale noqon kara arrin meesha ku jiro.

Sida go'aamada oo dhan ee la xiriira ubadka, Maxkamadda waxay go'aamin doontaa haddii guuritaanka la oggolaanayo iyadoo markaa lagu saleynaayo had iyo jeer tixgelinaysaa meesha ay ku jirto **maslaxadda ubadka** ku jirto. Haddii laguu ogolaado in aad la guurto ubadkaaga, Maxkamadda waxaa dhici karta in ay wax ka badesho Xukunkii ka warqabidda ubadka oo uu lahaa waalidka kale wax bay ka beddeleysaa. Waxaa waalidkan loo ogolaanayaa in uu waqti dheer la qaato caruurtiisa bacdamaa uu soo safri doono ama waxaa dhici kara in lacagta masruufka lagaa yareeyo bacdamaa uu waalidkan kharash badan ku soo bixiyo safarka ku soo booqanayo ubadka.

Sida ay u badantahay, Maxkamadda waxaa dhici karta in ay tiraahdo in aaddan laguu oggoleyn in aad ubadkaaga la guurto, haddii waalidka kale uusan kugu raacsaneyn.

La dhoofidda Ubadkaaga

Sida ay u badantahay haddii waalidka kale uu leeyahay xannaaneynta ama ka warqabida, ubadka mala tagi kartid Kanada meel dibada ka ah adiga oo aaddan waalidka kale fasax ka haysan. Tani waxay micnaheedu tahay Haddii aad dooneysid in aad ubadkaaga la dhoofto, waxaad u baahnaan doontaa Xukunka xannaaneynta iyo warqad ka socota waalidka kale oo fasax kuu siinaysa in ubadka Kanada lagala bixi karo. Warqadda waa in aad ka soo shabadeysaa ruux qareen ah si ay sharci u noqoto.

Kolka aad Kanada ka baxasid oo/ama isku daydo in aad wadan kale gasho, waa in aad ku talo gashaa in saraakiisha xuduuda fadhiyo ay ku wareysan karaan caddeyn ku aadan in waalidka ubadka dhalay oggol yahay safarka ubadka.

Afduubka Ubadka

marmarka qaar waxaa dhacda, waalidiinta mid ka mid ah in uu ubadka la baxsado oo uu waddanka Kanada ka bixiyo asaga oo aan waalidka kale fasax ka wadan. Tani waa arrin culus. Tani waxaa loogu yeeraa **afduub ilmo**. Kanada gudaheeda, in ilmo la afduubo waa dambi aad u culus.

Fasax la'aantaada in ubadka si sharci darro Kanada dibada looga saaro la ilaaliyo aad bay u adagtahay, laakiin waxaa jira wax yaabo aad sameyn kartid si ay caruurtaada u bad baado. Marka hore hubi in Xukunka ka warqabka ama heshiiska:

- ay u qoran tahay si fasiix ah oo tifa tiran;
- gaar ahaan oranaya ubadka Kanada dibada ugama bixi karo iyadoon fasax la'haan.

Xukunka Maxkamadda waxaa kaloo lagu qeexi karaa in baasaboorka ubadka ama baasaboorka waalidka kale.

Maxay Tahay Waxa La Sameynaayo Haddii Ubadkaaga Kanada Laga Saaro Idin La'aan

Haddii ay kula tahay in ubadkaaga wadan kale loo qaadey idin la'aantan, waa in aad:

- Isla markiiba **baliiska wac**. Baliiska wuxuu isla markiiba feejignaansho u dirayaa saraakiisha xudduda ee Kanada iyo wadamada waalidka kale laga yaabo inuu ubadkiisa uqaadey.
- Isla markiiba horey uga **Wac Xafiiska Arrimaha Qunsuliyadda**, qatka bilashka ah ee 1-800-387-3124 ama 1-800-267-6788. Xafiiskooda wuxuu furan yahay 24 saacadood maalinta, 7 maalmood todobaadkiiba.

Haddii ubadkaaga lagala baxsadey Kanada iyada oo aan idinkaaga la haysan, sidoo kale waa in aad isla markiiba u tagtaa qareen laanta socdaalka ah iyo qareen xeerka qoyska.

Sharciga keli ah ee laga yaabo in aad ubadkaaga kuu soo celin kara marka waddanka laga dhoofiyo wuxuu yahay midka *"Hague Convention on the Civil Aspects of International Child Abduction"*. Waa heshiis caalami ah oo ay kala saxiixdeen waddamo badan. Waddamada heshiiskan wada gaaray waxay ku heshiiyen in ay wada shaqeeyaan si ay u raadiyaan una soo masaafuriyaan caruurta si sharci darro ah looga soo dhoofiyey waddamadooda.

Haddii caruurtaada loo dhoofiyo waddan aan heshiiskan saxiixin, way dhib badnaaneysaa sida caruurtaada waddanka Kanada loogu soo celiyo. Haddii ay saa dhacdo, waad ka dacwoon kartaa arrintan adoo raacay sharciga u degsan waddanka caruurta la geeyey. Waxaad isku dayi kartaa oo kale ah in aad la xaajooto afduubaha iyo reerkiisa.

Xogwarran dheeraad ah oo ku saabsan sida aad uga hortagi lahayd afduubka ilmaha ka akhri *"International Child Abductions"*: Qoraal loogu tala galey Waalidiinta. Buugan waxaa soo saaray Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee Kanada. Wuxuu kuu fasirayaa oo kale meesha aad wax ka bilaabi lahayd haddii caruurtaada waddanka Kanada laga dhoofiyo adiga oo aanan raali ka ahayn. Waxaad nuqul ka codsan kartaa Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee Kanada ama ka aqri qatka internetka oo ah http://www.voyage.gc.ca/.
Riix "Children and Travel" oo ka dibna "Child Custody/welfare".

Ontario

• *Aragtida warqaddahan lagu soo bandhey waa aragtida FLEW u gaar ah oo ma ahan kuwa ay Gobolka la wadaagto.*

The Law Foundation of Ontario
Building a better foundation for justice in Ontario

• *Inkastoo ay taageero dhaqaale ay kaga timaado Ururka Samafalka Sharciga ee Ontario, waxyaabaha ku qoran daabacaadan muhiim ma ahan oo kama tarjumeyso aragtida Ururka.*

Waxaa jira halis weyn oo rabshado ah goorta xiriir soo jirey uu dhamaanayo. Haddii aad ku jirto halis kugu soo dhow, wac 911. Haddii adiga ama qof kale ee aad taqaano halis ku jiro, booqo www.onefamilylaw.ca si aad u hesho macluumaad taageero ah.

Haddii aad tahay qof dumar ah oo ku hadasho luqadda fransiiska oo ku nool gobolka Ontario, waxaad xaq u leedahay in laguugu adeego luqadda Fransiiska kolka ay maxkamadda xallineyso arrimaha xeerka qoyskaada. Xogwarran dheeraad ah ee ku saabsan xuquuqdaada, kala xiriir ruux qareen ah, xarumaha adeega arrimaha sharciga khuseeya, ama khadka taakuleynta Femaide 1-877-336-2433, TTY 1-866-860-7082.

Xogwarran dheeraad ah oo ku saabsan sida aad ku heli lahayd adeega luqadda Fransiiska ah ka fiiri shabakadda www.onefamilylaw.ca ama www.undroitdefamille.ca.

Mawduucyada Xeerka Qoyska oo diyaarka ah:*

1. Siyaabaha kale ee lagu Xallin karo Khilaafaadka iyo Xeerka Qoyska wuxu ka qabo (SOM 001)
2. Badbaadada Caruurta iyo Xeerka Qoyska (SOM 002)
3. Masruufka Caruurta (SOM 003)
4. Xeerka qoyska iyo kan Dambiyada (SOM 004)
5. **Xannaanaynta iyo ka Warqabka Caruurta (SOM 005)**
6. Heshiisyada Qoyska (SOM 006)
7. Gar-qaadida Xeerka Qoyska (SOM 007)
8. Xeerka Qoyska sida uu u quseeyo dumarka Soo galootiga ah, kuwa Qaxooyiga ah iyo kuwa aan Sharciga lahayn (SOM 008)
9. Sidii aad u heli lahayd cid kaa caawinta dhibaatada xeerka qoyska (SOM 009)
10. Sharciga Xeerka Qoyska sida uu u Qaybiyo Hantida reerka (SOM 010)
11. Guurka iyo furidda (SOM 011)
12. Masruufka Sayga (SOM 012)

** Buugan waxaa la heli karaa asagoo noocyo kale ah ama luqado kale ku qoran. Fadlan eeg shabakadda www.onefamilylaw.ca si aad u hesho warbixin dheeraad ah. Websaaydkeena waxaad kaloo ka heleysaa buugag badan oo kaa caawinaayo sida aad u aqoonsan lahayd xaqaada ku qoran sharciga xeerka qoyska.*

flew Family Law Education for Women
Women's Right to Know

fodf Femmes ontariennes et droit de la famille
Le droit de savoir